# OhioHealth

# Ogeysiiska Wada jirka ah ee Ku saabsan dhaqamada Xogta Sirta ah

**Ogeysiiskaan wuxuu sharaxayaa sida macluumaadkaaga caafimaadka loo isticmaali karo iyo sida loo shaacin karo iyo sidoo kale sida aad u heli karto macluumaadkaas. Fadlan u eeg si taxadar leh.**

OhioHealth waa nidaam caafimaad oo ay ka mid yihiin isbitaalo, rugaha caafimaadka, xarumaha caafimaadka bulshada, daryeelka caafimaadka guriga, iyo xirfadlayaal kale oo daryeelka caafimaadka bixiya. Ogeysiiskaan Wada jirka ah ee Ku saabsan dhaqamada Xogta Sirta ah (Ogeysiiska) wuxuu khuseeyaa OhioHealth, shaqaalaheeda caafimaadka, iyo adeeg bixiyaasha bulshada ee xariirka la leh gaar ahaan kuwa ka qaybgala diyaarinta daryeelka caafimaadka abaabulan. Wuxuu khuseeyaa keliya adeegyada aan bixino anagoo doorkeenu yahay daryeel bixiye caafimaad, mana khuseeyo hawlaha daryeelka ee aan caafimaadka la xariirin sida arrimaha la xariira jimicsiga, faya dhowrka, hab nololeedka, waxbarashada, shirkada, tababarka ciyaaraha, iyo adeegyada xariirka.

Adeeg bixiyaasheena caafimaadka waxay u shaqeeyaan si wada jir ah si ay u siiyaan daryeelka ugu fiican bukaankeena. Sida uu sharcigu qabo, macluumaadka caafimaadka ee dhowrsan waxaa lala wadaagaa arrimaha muhiimka si loo fuliyo daaweynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka. <u>Ogeysiiskaan ujeedadiisu waa in laguu sheego sida aan dadka kale ula wadaagno macluumaadkaaga iyo sidaad u ogaan lahayd xog badan oo ku saabsan dhaqamadeena wadaagista macluumaadkeena.</u>

Waxa laga yaabaa inaad heshid ogeysiiskaan intaadan soo booqan isbitaalka, ama waxaa laga yabaa inaad ka hesho xarunta aad soo booqaneyso kadib markaad timaado. Oggolaanshaha foomka daaweynta booqashadaan, waxaa lagugu waydiin doonaa inaad aqbasho (oggolaato) xaashida ogeysiiska ee asturnaanta sirta qofka.

## I. Waxaa Na Saaran Waajib Sharci ah Si aan u ilaalino Macluumaadkaaga Caafimaad.

Sharci ahaan waxaa nalaga doonayaa inaan ilaalino asturnaanta macluumaadkaaga caafimaadka ee la dhowray iyo inaan ku siino ogeysiiska waajibaadyada sharcigeena iyo hawlaha asturnaanta sirta. Waxaa nalaga doonayaa inaan kugu wargelino xadgudubyada la xariira macluumaadkaaga caafimaad ee aan la ilaalin. Waxaa nagala doonayaa inaan u hogaansano shuruudaha Ogeysiiskaan illaa iyo inta uu shaqeynaayo. Waxaan xaq u leenahay inaan wax ka badelno shuruudaha Ogeysiiskaan markii loo baahdo iyo inaan sameyno ogeysiis cusub oo waxtar u leh dhammaan macluumaadka caafimaad ee aan dhowrno. Waxaad heli kartaa nuqulka ogeysiis kasta oo dib loo eegay kuna jira waaxdaan diiwaangelinta xarunta ama waxaad nuqul ka heli kartaa markaad la xariirto Sarkaalka Asturnaanta Sirta ee OhioHealth. Ka fiiri macluumaadka xiriirka Qaybta VII ee Ogeysiiskaan.

## II. Waxaa Laga Yaabaa Inaan Isticmaalno oo aan shaacino (la wadaagno) Macluumaadkaaga Dhowrsan ee Caafimaadka.

1. **Oggolaanshahaaga.** Marka laga reebo waxyaabaha lagu xusay Ogeysiiskaan, uma isticmaali doono iyo/ama lamana wadaagi doono macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan cid kale ujeedo kasta illaa inaad saxiixdo foom aad ku oggolaanayso inaan shaacin karno iyo/ama isticmaali karno mahee. Waxaad xaq u leedahay inaad qaab qoraal ah uga laabato oggolaanshahaas illaa inaan qaadnay wax tallaabo ah oo ku tiirsan oggolaanshahaas mahee. Waxaa jira qaar kamid ah adeegsashada iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan oo ay muhiim tahay inaan markasta helno oggolaanshaha hordhaca ah kuwaasna waxaa kamid ah:
   - **Xariirka Suuqgeynta.** Ujeedooyinka dukumiintigaan, Xariirka Suuqgeynta kuma jiraan arrimahaan soosocda: haddii xariirka si toos ah adiga laguula soo sameeyo, waa hadiyad fudud oo suuqgeyn ah ahna dhiirigelin, waa xasuusin ku saabsan dib u dalbashada adeega, caafimaadka guud ama faya dhowrka caafimaadka, ama waa xariir ku saabsan waxyaabaha la xariira caafimaadka ama adeegyada ee aan bixino ama sida tooska ah xiriirka ula leh daaweyntaada.
   - **Iibinta badan ee macluumaadkaaga caafimaadka ee la dhowray.** Waxaan kaa dalban doonaa oggolaansho marka aan iibineyno macluumaadkaaga caafimaadka ee la dhowray, illaa in loo isticmaalaayo daaweyn mahee ama ujeedooyinka bixinta lacagta ama sidoo kale si uu sharcigu waafaqsan yahay.
   - **Isticmaalka badan iyo shaacinta waraqadaha cilmi nafsiga.** Waxaan kaa dalban doonaa oggolaanshahaaga inta badan isticmaalka iyo marka aan shaacineyno waraqadahaaga cilmi nafsiga, illaa inaan oggolaansho u haysano mahee ama aan sida sharcigu farayo.

2. **Daaweynta.** Waxaan isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan marka ay muhiim u yihiin daaweyntaada. Tusaale ahaan:
   - Dhaqaatiirta iyo kalkaalisooyinka iyo xirfadlayaasha kale ee qaybta ka ah daryeelkaaga waxay isticmaali doonaan macluumaadka kujira diiwaanka caafimaadka iyo macluumaadka aad bixisay ee ku saabsan astaamahaaga iyo falcelintaada si ay u qorsheeyaan habka laguu daaweynaayo oo ay kamid ahaan karaan qalliinada, qaadashada daawooyinka, baaritaanada, iwm.
   - Macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan waxaan la wadaagi karnaa xarun daryeel caafimaad oo kale ama xirfadle aan iskaashi nala lahayn, laakiin waa kuwo kusiinaya ama kusiin doonaa daaweyn. Tusaale ahaan, hadii aad ka tagto xarunta caafimaadka, si aad u hesho daryeelka caafimaadka guriga, waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad wakaalada bixisa daryeelka caafimaad ee gurigaas si daaweyntaada iyo daryeelkaaga laguugu diyaariyo.
   - Haddii lagaa daweeyay dhaawac kaaga dhacay jilibka, waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad shaqaalaha daaweynta jirka si ay kaaga caawiyaan qorsheynta dhaqdhaqaaqa.

3. **Bixinta Kharashka Daaweyntaada.** Waxaa laga yabaa inaan u isticmaalno ama la wadaagno macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan arriimaha la xariira bixinta kharashka ee xirfadlayaasha caafimaadka iyo xarumaha ku daaweeyay ama ku siiyay daaweynta. Tusaale ahaan, macluumaadkaaga ku saabsan baaritaanada caafimaadka iyo daaweynta waxaan u gudbin karnaa shirkadaada caymiska si aan ugu adeegsano diyaarinta kharashaadka adeegyada lagu siiyay, ama

waxaan macluumaadkaaga u adeegsan karnaa biilka aan adiga kusoo dirayno ama qofka masuulka ka ah bixinta kharashkaaga.

4. **Hawlaha Daryeelka Caafimaadka.** Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan u isticmaali karnaa arrimaha muhiimka ah, sida meelaha sharcigu qabo, ee ku aadan hawlaha daryeelka caafimaadkeena ayna kujiraan hormarinta caafimaadka, dib u eegida xirfadaha dhaqaatiirta, maamulka ganacsiga, aqoonsiga iyo helida ruqsada, iwm. Tusaale ahaan:
   - Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan la wadaagi karnaa ama u isticmaali karnaa arrimaha la xariira hormarinta daaweynta caafimaadka iyo daryeelka bukaanka.
   - Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan u isticmaali karnaa iyo la wadaagi karnaa xarumaha daryeelka caafimaadka ee iskaashiga nala leh iyo xubnaha daryeelka caafimaadka abaabula si ay ugu isticmaalaan hawlaha daryeelka caafimaadka sidoo kale waxaan la wadaagi karnaa kuwa abaabula daryeelka caafimaadka.
   - Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka xarun kale oo daryeelka caafimaadka qaabilsan, xirfadle daryeelka caafimaadka ah, ama qorshaha caafimaadka si loogu adeegsado arrimaha la xariira tayada caymiska iyo maareynta kiiska, laakiin waa keliya haddii xaruntaas, xirfadlahaas, ama qorshahaas ay xariir kula leeyihiin ama kula lahaayeen.

5. **Cilmi baaris.** Xaaladaha qaar oo xadidan, waxaa laga yabaa inaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan u shaacino arrimo cilmi baaris awgood. Tusaale ahaan marxaladaha:
   - Marka ururka cilmi baarista uu doonaayo inuu isku barbardhigo natiijooyinka bukaanada qaatay hal nooc oo daawo ah uuna doonaayo inay eegaan diiwaano caafimaad oo badan.
   - Dhammaan meelaha aadan ku bixin oggolaanshaha, xogtaada sirta ah waxaa lagu ilaalin doonaa shuruudo adag oo ay adeegsadaan Guddiga Dib u eegida Hay'ada ama guddiga asturnaanta xogta ayagoo kormeer ku sameynaaya cilmi baarista ama matalaad xadideysa cilmi baarayaasha si aysan u isticmaalin ama u shaacin macluumaadkaaga caafimaadka ee la dhowray.

6. **Ballamaha iyo Adeegyada.** Waxaa laga yabaa inaan kula soo xariirno sidaan kuu xasuusino ballamaha ama natiijooyinka baaritaanka ama adeeg kale. Waxaad leedahay xaquuq ku aadan xariiradaas, sida lagu sharaxay Qaybta V.

7. **Iskaashiga Ganacsiyada.** Qaybo kamid ah adeegyadeena waxaa qabta shaqsiyaad anaga naga baxsan ama ururo aan heshiis kula jirno, sida hanti dhowrka, aqoonsashada, adeegyada sharciga, iwm. Mararka qaar waxaa laga yabaa inay muhiim noqoto inaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan aan la wadaagno mid ama ka badan shaqsiyadkaas ama ururadaas na caawiya. Xaalad kasta oo jirta, waxaan iskaashatadaas ganacsiyada ka dooneynaa inay u hogaansamaan xeerka asturnaanta sirta ee macluumaadkaaga.

8. **Shaacinada iyo Adeegsashada kale.** Waxaan oggolaansho u haysanaa sharciguna noo oggolaanayaa inaan macluumaadkaaga caafimaad ee dhowrsan la wadaagno ama u isticmaalno arrimo gaar ah anagoon helin oggolaanshahaaga ama ruqsadaada.
   - Waxaan u sii deyn kartaa macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan ujeedo kasta oo uu sharcigu oggol yahay;

- Waxaa macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan la wadaagi karnaa hawlaha caafimaadka dadwaynaha, sida warbixinada loo baahan yahay ee cudurka, dhaawac, taariikhda dhalashada iyo dhimashada, iyo marka la rabo in loo isticmaalo baaritaanada caafimaadka dadwaynaha;
- Waxaan shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan sida uu sharcigu qabo haddii aan ka shakino inuu jiro xadgudub ilmo ama dayacaad iyo sida uu sharcigu qabo haddii aan aaminsanahay inaad tahay dhibane xadgudub, dayacaad, ama inaad la kulantay khalalaase guri;
- Waxaan diiwaanada talaallka la wadaagi karnaa dugsiga ardayga laakiin waa keliya haddii waalidiintu ama masuuliyiintu (ama ardayda haddii uusan ahayn ilmo yar) oggolaadaan ayagoo adeegsanaaya qaab af ah ama qaab qoraal ah;
- Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan la wadaagi karnaa Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka haddii ay muhiim tahay si ay u sheegaan dhacdooyinka xun, ciladaha alaabaha, ama inay u isticmaalaan dib usoo celinta alaabaha;
- Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan la wadaagi karnaa shirkadaada marka aan ku siino daryeel caafimaad oo ay naga codsatay shirkadaadu si loo oggaado xanuunada iyo dhawaacyada ka dhasha goobta shaqada, iyo inta badan, waxaad heli doontaa ogeysiis kula socodsiinaya in macluumaadkaaga lala wadaagaayo shirkadaada;
- Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan la wadaagi karnaa haddii sharcigu sidaas dhigaayo wakaaladaha kormeerka ee dawlada si ay ugu adeegsadaan hanti dhowr, baaritaano, ama dhageysashada dacwadaha madaniga ah ama kuwa dembiyada;
- Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan u shaacin karnaa arrimaha la xariira u yeerista ama helitaanka codsiga haddii uu sharcigu oggol yahay, mararka qaarna, waxaad heli doontaa ogeysiiska shaacinadaas;
- Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan la wadaagi karnaa laamaha fulinta sharciga sida uu dhigaayo sharcigu si ay ugu adeegsadaan soo gudbinta dhaawacyada iyo waxyeelooyinka iyo dembiyada;
- Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan la wadaagi karnaa dhaqaatiirta iyo/ama qabanqaabiyaasha aaska sida uu dhigaayo sharcigu;
- Waxa laga yaabaa inaan cid la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad haddii loo baahdo si loo diyaariyo deeqida xubinta ama unug jirkaaga ka mid ah ama mid adiga lagugu beerayo;
- Waxa laga yaabaa inaan la wadaagno xogtaada caafimaad ee dhowrsan qaybo kamid ah cilmi-baarisyada markay u oggolaadaan gudida dib-u-eegida hay'adeed iyada oo la eegayo qawaaniin gaarka ah si loo illaaliyo arrimaha qofka u gaarka ah;
- Waxaan shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan haddii aan ka shakino inay jirto khatar wayn oo la xariirta caafimaadka iyo badqabka;
- Waxaan shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan haddii aad tahay xubin ka tirsan militariga waxaana la wadaagi karnaa laamaha fulinta ciidanka sida uu qabo sharcigu, iyo sidoo kale haddii ay muhiim tahay waxaan la wadaagi karnaa laamanaha amniga qaranka iyo sirdoonka; iyo
- Waxa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad ee dhowrsan wakiilada xaq-siinta shaqaalaha haddii loo baahdo si loo go'aamiyo faa'iidada (xaq-siinta) shaqaalaha.

## III. Diyaarinta Daryeelka Caafimaadka Qorsheysan.

OhioHealth waxay ka qaybqaadataa mid kamid ah ama ka badan diyaarinta daryeelka caafimaadka la qorsheeyay (OHCA) oo ay wehliyaan adeeg bixiyaasha bulshada, sida isbitaalada iyo hawlaha dhaqaatiirta,

kuwaas oo isticmaala nidaamkeena diiwaangelinta caafimaadka ee Epic. Marka aan ka qaybgelayno OHCA, waxaan qaab elektaroonig ah ku heli karnaa macluumaadka adiga kugu saabsan oo ay aruuriyeen adeeg bixiyaasha kale ee qaybta ka ah OHCA sidoo kale waxaa laga yabaa inaan macluumaadkaaga la wadaagno adeeg bixiyaasha kale ee ka qaybgalaaya. Anaga iyo adeeg bixiyaasha kale ee ka qaybqaadanaaya waxaan u isticmaalaa macluumaadkaaga inaan adiga kugu daaweyno, kula socono daryeelkaaga, ku helno lacagta daryeelka iyo inaan u adeegsano hawlaha daryeelka caafimaadkaaga (sida qiimeynta iyo kor u qaadida daryeelka adeeg bixiyaasha ka qaybgelaaya OHCA).

Adeeg bixiyaasha ka qaybgelaaya OHCA waa ururo madax banaan mana jiro adeeg bixiye ka qaybgelaaya oo ah shaqaale, hay'aad, iskaashade ama shaqo wadaag la ah adeeg bixiye kale oo ka qaybgalaaya (marka laga reebo xaaladaha qaar oo xadidan sida marka adeeg bixiyaha ka qaybgalaaya uu heshiis gaar ah la galo adeeg bixiye kale oo ka qaybgalaaya mahee). Adeeg bixiye kasta waxa uu sameeyaa tallaabooyinka muhiimka u ah ka qaybgalka OHCA waxa ayna shaaciyaan macluumaadka bukaanka si loogu adeegsado daaweynta iyo ujeedooyinka kale ee sharcigu oggol yahay.

## IV. Waxaad Fursad u Haysataa Inaad Diido ("Iskaga Baxdo") Isticmaalida iyo Shaacinada:

1. **Diiwaanka Xarunteena.** Waxaan kaydinaa diiwaanka xarunta oo ay ku qoran yihiin magacaaga, goobta ama lambarka qolka, xaalada guud, iyo, haddii aad jeceshahay, iskaashatada diintaada. Illaa inaa doorato macluumaadkaaga in laga saari diiwaanka mahee, macluumaadka, oo aysan ku jirin arrimaha la xariira diintaada, waxaa loo soo bandhigi doonaa qof kasta oo codsada asagoo ku waydiisanaaya magac ahaan. Macluumaadkaan, oo ay kujiraan kuwa la xariira diintaada, waxaa sidoo kale lala wadaagi karaa xubnaha wadaadada diinta. Waxaad xaq u leedahay inta lagu jiro isdiiwaangelinta in macluumaadkaaga laga saaro diiwaankaan iyo inaad sidoo kale si macquul ah loo xadido macluumaadka aad bixisay iyo/ama cida la siiyo.

2. **Qoyska iyo Saaxiibada Ka qaybqaata Daryeelkaaga.** Anagoo eegayna xaaladaha qaarkood, waxaa laga yabaa in intii muddo ah inaan macluumaadkaaga caawimaad ee la dhowray la wadaagno qoyska, saaxiibada, iyo dadka kale qaybta ka ah daryeelkaaga ama bixinaaya kharashka daryeelkaaga si qofkaas ay ugu fududaato hawlaha la xariira daryeel bixintaada ama bixinta lacagta daryeelkaaga. Haddii aan lagu heli karin, aadan awoodin, ama aad wajahayso xaalad caafimaad oo degdeg ah aana oggaano in shaacin macluumaad oo yar ay muhiim u tahay xaaladaada, waxaa laga yabaa inaan la wadaago macluumaadka caafimaadka oo dhowrsan oo xadidan shaqsiyaadkaas anagoon helin oggolaanshahaaga. Sidoo kale macluumaadka caafimaadka ee dhowrsan oo yar waxaan la wadaagi karnaa hay'aad dadwaynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay oo loo oggol yahay inay gacan ka geysato dadaalada gargaarkaaga masiibada si hay'aadaas u hesho xubin ka tirsan qoyska ama dadka kale oo ku lug leh qayb kamid ah daryeelkaaga.

3. **Aruurin Deeqda.** Qaybo yaryar oo kamid ah macluumaadkaaga caafimaadka ee la dhowray ayaan isticmaali karnaa si aan kuula soo xariirno laguuguna deeqo dadaalada deeqda ama kuwa anaga wakiil naga ah. Macluumaadkaas yar waxaa kamid noqon kara magacaaga, ciwaankaaga, macluumaadka kale ee xiriirka, da'da, jinsiyada, taariikhda dhalashada, taariikhda aad daryeelka caafimaadka ka heshay OhioHealth, dhaqaatiirta bixinaaa daaweynta, waaxaha iyo natiijada macluumaadka iyo sidoo kale xaalada caymiska caafimaadka. Isticmaalida macluumaadkaan yar waxa uu naga caawin doonaa inaan si gaar ah ugu caddeyno dadaalkeena aruurinta deeqda.

Waxaad xaq u leedahay inaad "ka baxdo" helida agabyada deeqda/xiriirada waxaadna sidaas sameyn kartaa adoo magacaaga iyo ciwaankaaga usoo diraaya Xafiiska Anshaxa iyo Dhaqamada OhioHealth, oo ku yaala 3430 OhioHealth Parkway, Columbus, Ohio 43202, ama **CompliancePrivacy@ohiohealth.com** adoo sooraacinaaya bayaan aad ku sheegayso inaadan dooneyn inaad hesho agabyada deeqda ama xiriirka dhankeena ka imaanaya.

## V. Xaqa aad u Leedahay Macluumaadkaaga Caafimaadka ee La dhowray.

1. **Helida Macluumaadkaaga Caafimaadka ee La dhowray.** Xaq baad u leedahay inaad nuqul ka samaysato iyo/ama inaad eegto inta badan macluumaadkaaga caafimaad ee aan adiga kuu hayno.
   - OhioHealth waxay ku talinaysaa inaad isticmaasho MyChart si aad u hesho qaar kamid ah macluumaadka. Haddii aadan lahayn akoon MyChart ah, mid ayaad ka sameysan kartaa: https://mychart.ohiohealth.com/MyChart/signup
   - Dhammaan codsiyada lagu codsanaayo helida xogta waa inay yihiin qoraal aadna soo saxiixdo ama uu saxiixo qof wakiil kaa ah. Haddii uu jiro kharash waanu kuu sheegi doonaa.
   - Sidoo kale waxaan kugu soo dalacaynaa lacagta boostada haddii aad codsato nuqulka boosto laguugu soo diraayo sidoo kale waxaan kugu soo dalici doonaa lacagta diyaarinta soo koobida macluumaadka aad codsatay haddii aad codsato xogtaas kooban camal. Waxaad heli kartaa foomka codsiga oo marin u helid ah oo ay bixiso Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.
   - Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul elektaroonig ah oo ah macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan lana heli karo oo ah qaab elektaroonig ah waxaadna si toos ah u amri kartaa in nuqulka loo gudbiyo hay'aad ama qof aad adigu u igmatay, ayadoo la hubinaayo in bixin kasta oo noocaan ah ay tahay mid cad, oo muuqata, oo gaar ahaan leh magaca oo buuxa iyo ciwaanka boostada ama macluumaad kale oo la aqoonsan karo.
   - Waxaa laga yabaa inaan kharash kaa qaadno hawsha aan qabaneyno iyo sahayda lagu diyaarinaayo nuqulkaaga elektarooniga ah ee macluumaadka caafimaadka ee dhowrsan.

2. **Isbadelada Macluumaadkaaga Caafimaadka ee La dhowray.** Haddii aad aaminsan tahay inay wax ka qaldan yihiin macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan ama aad aaminsan tahay in macluumaadku u baahan yahay in wax laga badelo si loo saxo, waxaad xaq u leedahay inaad si qoraal ah kusoo codsato wax ka badelida ama saxida macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan.
   - Waajib naguma ahan inaad sameyno dhammaan isbadelada lasoo codsaday laakiin codsi kasta waxaan u fiirin doonaa si taxadar leh.
   - Dhammaan codsiyada isbadelada, si aan ugu sameyno tixgelin, waxaa qasab inay yihiin qoraal, aadna soo saxiixday ama uu saxiixay wakiilkaaga, sidoo kale waa in lagu qoraa sababtaa aad u codsanayso isbadelka/saxida.
   - Haddii isbadelka ama saxitaanka aad codsatay aan sameyno, waxaan ogeysiin karnaa dadka kale ee nala shaqeeya waxaana kaydsan karnaa nuqulka diiwaanka aan saxneyn haddii aan aaminsanahay in ogeysiiskaas uu muhiim yahay.
   - Waxaad foomka aad ku codsanayso isbadelka ka heli kartaa Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.

3. **La xisaabtanka Shaacinta Macluumaadka Caafimaadkaaga La dhowray.** Waxaad xaq u leedahay inaad hesho isla xisaabtan ku aadan qaar kamid ah shaacinada aan sameyno ee ku saabsan

macluumaadka caafimaadkaaga ee la dhowray. Xaquuqdaan ma quseyso shaacinada aan sameyno ee loo adeegsado ujeedooyinka daaweynta, bixinta lacagta ama hawlaha daryeelka caafimaadka.

- Codsiyadu waa inay yihiin qoraal aadna soo saxiixdo ama uu saxiixo qof wakiil kaa ah.
- Foomamka codsiyada isla xisaabtanka waxaa laga heli karaa Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.
- Isla xisaabtanka koowaad ee la sameeyo 12kii billood oo kasta waa lacag la'aan; waxaa laga yabaa in lacag lagugu soo dalaco haddii aad codsato isla xisaabtan kasta oo kale oo aad sameyso isla muddadaas 12ka bilood ah.
- Isla xisaabtanka waxaa lagu ekeysiin doonaa lix sano kahor taariikkhda codsiga.

4. **Xadidaada Isticmaalida ama Shaacinta ku saabsan Macluumaadkaaga Dhowrsan ee Caafimaadka.** Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in xadid lagu sameeyo sida aan u isticmaalo una shaacino macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan ee loo isticmaalo daaweynta, lacag bixinta, ama hawlaha daryeelka caafimaadka.
    - Ma xadidi kartid isticmaalida uu noo oggol yahay sharcigu.
    - Foomka codsiyada xadidaada waxaa laga heli karaa Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.
    - Inta badan, qasab ma ahan inaan aqbalno codsiga xadidaadaada, laakiin waxaan iskudayi doonaa inaan wax ka qabano codsiyadaada macquulka ah marka ay habboon tahay.
    - Waxaan xaq u leenahay inaan meesha ka saarno xadidaada aan ku heshiinay haddii aan aaminsanahay inay sidaas habboon tahay. Haddii ay marxaladaas timaado, waan kula socodsiin doonaa.
    - Sidoo kale adna waxaad xaq u leedahay inaad meesha ka saarto xadidaad kasta oo aan ku heshiinay adoo ogeysiis qoraal ah, oo aad saxiixday ama uu saxiixay wakiilkaaga, kusoo diraaya Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.
    - Haddii guud ahaan biilka adeegyadaada aad adigu iska bixisay, ayna lacagtii kaa dhamaatay, aadna naga codsato inaanan macluumaad ku saabsan adeeg gaar ah aanan u dirin shirkada caymiskaaga si ay u bixiyaan lacagta, waan xushmeen doonaa codsigaan haddiiba macluumaadku uusan sharaxeyn adeegyo kale oo ay laanta caymiskaagu bixinayso lacagtooda.

5. **Xiriirka Qarsoodiga ah.** Xaq ayaad u leedahay inaad soo gudbiso codsi waxaana isku dayi doonaa inaan aqbalno codsiyada macquulka ah ee aad soo gudbiso ama uu soo gudbiyo wakiilkaaga si aad nooga hesho xiriir ku aadan macluumaadkaaga caafimaadka ee la dhowray anagoo adeegsanayna qaab kale ama goobo kale. Marxaladaha qaar, haddii aad dooneyso in fariimaha xasuusinta ee ballamaha aan cod fariin ah laguugu reebin ama aad dooneyso inaad laguugu soo diro ciwaan gaar ah, waxaan aqbali doonaa codsiyada macquulka ah. Xiriirkaan qarsoodiga ah waxaad ku codsan kartaa qaab qoraal ah waxaad codsigaaga kusoo diri kartaa Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.

6. **Nuqulka Warqada.** Xaq baad u leedahay inaad hesho nuqul waraaq ah oo Ogeysiiskan ku saabsan, xataa haddii aad nuqulkaas ku codsatay iimayl ama dariiqo kale oo elektarooniga ah.

## VI. Ogeysiisyada Shaacinada Aan Sharciga ahayn.

Marxaladaha marka ay jiraan xadgudubyo ku aadan shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka ee dhowrsan, waxaad heli doontaa ogeysiis iyo macluumaad ku aadan tallaabooyinka aad qaadi karto si aad iskaga badbaadiso waxyeelooyin.

## VII. Su'aalaha iyo Cabashooyinka.

Haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah oo ku saabsan Ogeysiiskaan, waxaad la xiriirr kartaa Xafiiska Dhowrista Sirta ee OhioHealth oo ku yaala 3430 OhioHealth Parkway, Columbus, Ohio 43202, ama wac 1-866-411-6181. Haddii aad aaminsantahay in xaquuqadaada asturnaanta xogta lagu xad gudbay, ama aad khilaafto go'aan aan samaynay oo ku saabsan sida lagu helayo xogtaada caafimaad, waxaad la xiriir kartaa:

- Xafiiska Dhowrista Sirta ee OhioHealth, ama
- Xoghayaha Maraykanka ee Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee ku taala Washington D.C. adoo u diraaya qoraal muddo 180 cisho gudahooda ah marka laga bilaabo markii lagu xad gudbay xuquuqdaada.
- Kaa aar-goosan mayno haddii aad soo gudbiso cabasho.

## VIII. Taariikhda Dhaqan Galka.

Ogeysiiskan fulinta dhaqanada asturnaanta ee Wada jirka ah wuxuu dhaqan galay Juun 1, 2017. Waxaa dib loo eegay 3/16/2021.